| DOWLADDA PUNTLAND EE SOOMAALIYEED<br><br>Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaalka & Dimuqraadiyaynta | | حكومة بونتلاند الصومال<br><br>وزارة الداخلية ، شئون الفدرالية و الديموقراطية |
|---|---|---|

**Ministry of Interior, Federal Affairs and Democratization**

| Xafiiska Wasiirka | Garowe | مكتب الوزير |
|---|---|---|

***REF:*** ***XW/WAG/F/D/149/019*** **Date: 19- Oct– 2019**

**Ku:** **Dhammaan Guddoomiyaasha Gobolada DPL**
**Ku:** **Dhammaan Guddoomiyayaasha Degmooyinka DPL**
**Og:** **Taliyaasha Qaybaha Booliska Gobolada DPL**
**Og:** **Wasaaradda Amniga & DDRka DPL**
**Og:** **Madaxwaynaha DPL**

**Ujeeddo: Joojin Xaafiisyada Siyaasadeed ee ay furanayaan xildhibaanada Dowladda Federaalka**

Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dimuqraadiyeynta Dowladda Puntland ayadoo tixraacaysa dhaq dhaqaayada ay Xubnaha Xildhibaanada Dowladda Federaalka Soomaaliya ka wadaan deegaanada Puntland, ayna ku furayaan xafiisyo loogu magac daray "Xiriirka Bulshada iyo Xildhibaanada". Wasaaraddu waxay cadeynaysaa in Xildhibaanada Federaalka Soomaaliya ee hadda wakhtigoodii sii dhamaanayo ay ku yimaadeen hab-qaybsiga beelaha ee aysan ku imaan hab-deegaan doorasho.

Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dimuqraadiyeynta Dowladda Puntland waxay kaloo cadeynaysaa inaysan jirin wax ka tashi isla ogol ah oo ay wali Xukuumadda Federaalka iyo Dowladaha xubnaha ka ah Dowladda Federaalka ah ay ka gaareen hanaanka doorashooyinka ay ku imaanayaan Xildhibaanada Federaalka iyo Madaxda Federaalka ee xiligu ka sii dhamaanayo.

Hadaba, waxaa dhamaan masuuliyiinta warqaddaani sida tooska ah ugu socoto la farayaa inaan illaa amar dambe gudaha Puntland laga furi karin wax xafiisyo siyaasadeed ah sida kuwa ururada siyaasigaa ee heer Federaal iyo kuwa ay furayaan shaqsiyaadka ka tirsan xildhibaanada Dowladda Federaalka ah. Waxaa kaloo la farayaa in si deg deg ah loo xiro xafiisyada laga furay degmooyinka Puntland qaarkood.

Fulin wacan

**Maxamed Cabdiraxmaan Dhabancad**
**Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaalka & Dimuqraadiyaynta**

For more information contact us office of the Minister Email:
info.moifad@plstate.so or minister.moifad@plstate.so Phone: +252(90) 7637870